

Raac tallaabooyinkan si aad jeermiska uga disho ishaada biyood haddii bakteeriya laga helo biyahaaga, nidaamkaaga biyaha oo dayac tir lagu sameeyay, ama haddii nidaamka uu daad qaaday ama wasakhoobay.



Kahor intaadan Jeermiska Ka Dilin Nidaamkaaga Biyaha

Baadh nidaamkaaga biyood adiga oo toos u indha indhaynaya oo samee wixii dayactir ah.

- Fiiri oo hagaaji meel kasta oo wasakhawga bakteeriyadu ka imanayo ee ku hareeraysan ishaada biyaha, dildilaaca muuqda, meelayawga awdan ee halka ay biyuhu kasoo baxaan ama ka galaan, qashinka gudaha sanduuqa nidaamkaaga biyaha, daboolada dabacsan, iwm.

Tixgeli inaad ka eegto nitrate iyo chloride si ay kaaga caawiso inaad ogaato isha.

- Nidaam nadiifineed ama beer kuu dhow ayaa noqon karta isha wasakhawga.

Soo dhaanso biyo ku filan oo ku haynaya 3 ilaa 5 maalmood.

- Karkari hal daqiiqo biyo kasta oo loo isticmaalo cabbitaanka, karinta, dhaqida cuntada, cadayashada, ama samaynta baraf ama caanaha ilmaha. Waxaad sidoo kale ka heli kartaa ama ka iibsan kartaa biyo meel kale oo ammaan ah. **Fiiri gaar ah: biyaha karkaraya waxa laga yaabaa inay isu ururiyaan wasakhda kale, sida nitrate-ka, xilliga, ee nidaamkaaga biyaha.** Kaliya karkari biyahaaga haddii aad ogtahay inaysan wasakh kale ku jirin biyahaaga.

Ku nadiifi biyo nidaamkaaga haddii biyuhu u muuqdaan kuwo caddaan ah ama ay ka buuxdo huubo.

- Fur qasabadda dibadda oo biyo raaci qiyaastii hal mug oo ceelka ah. Ka digtoonow inaad ceelka faaruqiso, kaas oo wax yeeli kara oo sababi kara in biyahaagu wasakhoobaan.

Hage Tallaabo-Tallaabo ah oo lagu Jeermis Dilayo Ishaada Biyaha

Waxa aad si toos ah ishaada biyaha ugu dari doonta calcium hypochlorite iyo koloriin. Biyaha koloriinta leh waxay dhex qulquli doonaan dhammaan tubooyinka iyo qasabadaha gurigaaga.

1. Ka saar ama ka leexo qalab kasta oo biyaha lagu daweeyo, sida jilciyaasha biyaha ama unugyada osmosis-ka, maadaama ay nadiifintu waxyeello u geysan karto. Waxaad u baahan doontaa inaad si gooni ah jeermiska uga disho aaladahaan iyadoo la raacayo tilmaamaha soo saaraha.

2. Soo ururi agabka loo baahan yahay: galoofyada caagga ah, qalabka ilaalinta indhaha, nadiifiyaha koloriintu ku jirto ee guryaha oo aanu ku jirin wax udgoon ama wax lagu daro, calcium hypochlorite (aan lahayn algicides, chlorine stabilizers/conditioners, acids, ama jeermiska kale), baaldi 5-galaan ah, burush yar, tuubada beerta, iyo koob wax lagu cabbiro. **Xidho galoofyada caagga ah iyo qalabka ilaalinta indhaha mar kasta oo aad adeegsanayso nadiifiye.**
3. Ka fogee carruurta iyo xayawaanka rabaayada ah aagga, gaar ahaan biyaha la nadiifinayo iyo kuwa koloriinta leh. Haddii uu bam ku shaqeyo, dami bamka.
4. Xisaabi inta xaddiga jeermis dilaha aad ugu baahan doonto nidaamkaaga biyaha. Isticmaal 65-70% calcium hypochlorite pellets adag oo si dhakhso ah umimaysa (aan lahayn wax lagu daro). Qiyaas mugga biyaha ee sanduuqa nidaamkaaga biyaha. **100kii galaan ee biyaha ahba waxaad ugu baahan doontaa 3 wiqiyadood oo pellet ah.** Sanduuqyo badan oo nidaamkaaga biyaha ah, **qotada 2-da fiit ahi waa 100 galaan oo biyo ah,** laakiin waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad wax ka beddesho xisaabintan adigoo ku salaynayo nidaamkaaga biyaha. Hal cubic fiit oo biyo ah waxay la mid tahay 7.5 galaan. Hadafka waa in xaddiga koloriinta ku jirta biyaha gaadhaa inta u dhaxaysa 100 iyo 200 ppm.
5. Biyo raaci oo ka daadi biyaha sanduuqa nidaamkaaga biyaha oo ka saar qashinka iyo wasakhda. Ku xoq gudaha sanduuqa nidaamkaaga biyaha dareero koloriin ah oo xooggan (1/2 koob oo cad, aan ur lahayn, nadiifiyaha dharka lagu dhaqdo oo dareere ah oo lagu qasay 5 galaan oo biyo ah.
6. U oggolow sanduuqa nidaamkaaga biyaha inuu ka buuxsamo biyo cusub. Ku dar 3 wiqiyadood (85 garaam) oo calcium hypochlorite ah 100 galaan oo biyo ah kasta oo nidaamkaaga biyaha ku jira. Fur si biyuhu u buux dhaafaan.
7. Tag qasabada gurigaaga gudahiisa oo inta ugu badan u jirta nidaamkaaga biyaha oo ku sii daa biyaha qabaw illaa inta aad ka urinayso nadiifiyaha. Xir tuubada, ka dibna sidaas oo kale ku samee biyaha kulul. Ku celi tallaabadan dhammaan qasabadaha, qubeyska iyo baadka, musqulaha, iyo qasabadaha bannaanka. **Ka saar shaandhooyinka qasabadaha sababtoo ah waxay ku xirmi karaan qashinka soo baxaya marka aad nadiifinta wado.**
8. **Ku dhaaf biyaha koloriinta leh tuubooyinka ugu yaraan 8 saacadood, laakiin aan ka badnayn 12 saacadood** si aad u siiso koloriinta wakhti ay jeermiska kaga disho nidaamkaaga. Haddii heerka qulqulka aad u sarreeyo si biyaha koloriinta leh loogu daayo 8 ilaa 12 saacadood, isticmaal taangi si aad ugu shubto dareeraha koloriinta sanduuqa nidaamkaaga biyaha si joogto ah ugu yaraan 8 saacadood.
9. 8 ilaa 12 saacadood ka dib, nadiifi nidaamka ilaayo urta nadiifiyaha aad urin waydo. Ku bilow qasabadaha dibadda. Ku xidh tuubada beerta si ay biyaha ugu faaruqiso banaanka jayga ah ama dhul beeran oo ka fog nidaamkaaga nadiifta ah iyo durdur kasta. Ku daadinta xaddi badan oo biyo koloriin leh ah nidaamkaaga nadiifinta waa ay waxyeellayn kartaa. Waxaa laga yaabaa inaanad biyaha si xawli ah uwada furin ama aad xidho qasabadda marmar si

aad ugu oggolaato in nidaamkaaga biyuhu uu dib ubuuxsamo oo uusan u engagin.

10. Biyo raaci tuubooyinka gurigaaga dhexdiisa adiga qasabadaha kulka iyo kuwa qabowba labada furaya ilaa aad ka waayayso urta nadiifiyaha.
11. Ka saar, nadiifi, ka dibna baddal shaandho kasta oo tubooyinkaaga ku jirtay sababtoo ah waa ay awdi karaan marka aad nadiifinta wado.
12. Dib u tijaabi biyahaaga 2 ilaa 3 maalmood ka dib marka urta koloriin ka baxdo. Ka dalbo agabka baaritaanka bakteeriyada (Kit A) Shaybaarka Waaxda Caafimaadka. Waxaa laga yaabaa inaad noqoto inaad dib u tijaabiso 2 ilaa 4 toddobaad ka dib si aad u hubiso in bakteeriyadu aanay soo galayn nidaamkaaga biyaha. Ku nadiifi qasabada adigoo ku xoqaya tiishka alkohoosha leh iyo suuf ka hor inta aanad qaadin muunada.
13. Sii wad inaad karkariso biyahaaga ama ka hel biyo meel ammaan ah ilaa baktiiriyada laga waayayo biyaha.

Macluumaad Dheeraad ah

- Booqo [HealthVermont.gov/water/coliform-bacteria](https://www.healthvermont.gov/water/coliform-bacteria) (link-ga oo Ingiriisi ah)
- **Su'aalo ma qabtaa?** Ka wac Barnaamijka Biyaha Cabitaanka 802-489-7339